



MASHRUUCA TAYEYNTA HEY'ADAHA DOWLADDA Warbixin Saddex- Biloode ah

ABRIIL – JUUN 2019

QODOBBADA:

1: Istraatiyadda Horumarinta iyo dib-u habeynta maamulka dowlada

2: Madax-ka-tirinta shaqaalaha

3 & 4: Dib-u-habeynta mashruuca CIP

5: Kullanka Wadajirka DFS/Puntland & Mushaaricda Dowlaadeed ee uu Taageero Bangiga Aduunka

6: Horumatinta Siyaasada Howlgabka ee Dowladda

7: Aqoon Isweydaarsiga Siyaasada & Sharci Qorista

7: Xaalada Shaqaalaha CIP



Public Sector Reform



Istraatijiyyadda Horumarinta iyo Dib-u-habaynta Maamulka Dowlada

In kasta oo uu ajandaha dib-u-habaynta dawladdu uu shaki la'aan leeyahay himilo, haddana waxaa jira in horumar baaxad leh laga gaaray qaybaha muhiimka u ah maamulka dawladda. Hase-yeshee ma jiro qaab istiraatiji ah oo si buuxda u hagaya qaabeynta iyo dejinta barnaamijyo nidaamsan oo hirgelinaya dib-u-habayntaas. Waxaa welii jira qeexid la'aan xagga waajibaadka shaqo iyo howlaha ka jira dhammaan Hay'adaha Dowladda Federaalka ah iyo heerarka Maamul gobalaydyada. sababo badan awgood, qaababka sharciga iyo siyaasadaha ama kan istiraatijiyyadeed ee guud ahaan lagu hago shaqooyinka wasaaradaha waxaa muuqata in wax ka badal u baahan yihin ama ay ku jiraan marxalad hore ama billaw ah ee horumarkooda ku aaddan.

Waxaa jiray Guddi dawladeed oo loo magacaabay (kaasoo ay hogaaminayso Wasaaradda Shaqada iyo Arimaha Bulshada) in ay soo xulaan la-taliye ka shaqeeya horumarinta qaableh istiraatijiyyad qaran, kasoo hagaya ajendeha isbeddellada qaybaha Dowladda. Tani waa mid tixgelin mudan

oo lagu horumarinayo ujeeddooyinka istiraatijiyyadeed ee muhiimka ah iyo tiirarka dib-u-habeynta maamulka guud ee dowladda, gaar ahaan 5-ta sano ee soo socota (2018-2023)

Ujeeddada ugu weyn ee hawshan muhiimka ah waa mid lagu sameeynayo habka cusboonaysiinta istiraatijiyyadda guud ee heer qaran, kaas loogu talo-galay qaab-dhismeedka dhexdhixaadka ah oo ku saleysan muddada-dheer xagga isbeddellada maamulka guud iyo barnaamijyadiisa , iyo in si habaysan loo hirgeliyo wax ka qabashada waxqabadka dawladda iyo horumarinta qeybaha kale ee bahwadaagta la ah. Hanaanka geed-socodkaasi, wuxuu u baahan yahay falanqeyn dhab ah oo lagu sameeynayo guud ahaan dul-duleellada ka jira tayada Hay'adaha dowladda, hay'ad ahaan ama siyaasad ahaan iyo heerarka qaab-dhismeedkooda. Waxaa intaas dheer oo muhiim ah in dib-u-eegis lagu sameeyo hay'adaha hadda jira gaar ahaan dhanka dib-u-habeynta maamulka guud, iyo in la helo talooyin munaasab ah ee ku aaddan qaab-dhismeedka Hay'adahaasi iyo ka dhaqan galintooda dalka Soomaaliya.



TIRAKOOBKA SHAQAALAH & HABRAACA LA HIIGSANAYA

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) waxay la wadaagtay kooxaha mashruuca Bangiga Adduunka qodobbo muhiim ah ee warbixinta madax-ka-tirinta (HR audit) adeegga Rayidka, lyagoo la wadaageen in qiimeyn dheeraad ah ee lagu sameynaya si loo baaro, loona hubiyo, lana adeegsanayo nidaamka diiwaangelinta guud ee baayoomitrikada, gaar ahaan laamaha amniga ee dowladda (militariga iyo booliska) iyo sidoo kale shaqaalaha Maamulka Gobolka Banaadir. Tani waa mid lagu bardhigayo xogta shaqaalaha dowladda ee horey loo diiwaan galiyay si loo ogaado suurtagalnimada inay jирто bixin mushaar laba-laaban ee la siiyay mid ka mid ah shaqaalaha dowladda. Howshaan baaxada leh waxaa soo gabagabeeyey isla markaane hogaminaya Wasaaradda Maaliyadda iyada oo lala kaashanayo Wasaaradda Shaqada iyo Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka. arrintaan, wasaaraddu waxay rabtay inay daaha-ka-rogtu warbixin dhamaystiran ee madax-ka-tirinta (HR audit)

adeegga Rayidka, taasoo ujeeddadeeda tahay hagidda dawladda iyo qeybaha kale ee daneynaya warbixinta madax-ka-tirintan. Bangiga Adduunku wuxuu markaa heli lahaa warbaxin la xiriirta isku-darka natijjooyin isku-dhafan ee ku aaddan madax-ka-tirinta (HR audit), marka loo eego tirada maqnaanshaha, 'shaqaalaha cillan' (ghost workers) ee aan cudur-daar lahayn, sido kale tirada shaqaalaha rayidka ee hawlgabka ah iyo sidoo kale tirakoob kala duwan ee metelaya shaqaalaha adeegga rayidka dowladda (Civil Service) marka loo eego boqolleydooda; darajooyinkooda, heerarkooda waxbarasho iyo jinsigooda (iwm). Tani waxay iftiimisay inay jирто baahi degdeg ah oo loo qabo helitaanka Nidaamka Maareynta Macluumaadka ee Kheyraadka Aadanaha (HRMIS) oo si dijital ah loogu maareynayo keydka macluumaadka shaqaalaha dowladda kasoo loo adeegsanayo habab kaladuwani oo lagu xaqiijinayo, loona adeegsan doono dhammaan Hay'adaha Dowladda.



Dib-u-habeynta Mashruuca CIP

Kullanka howlgalka wadajirka ah waxay muhiim u tahay guud ahaan falanqeynta xaaladda mashruuca Tayaynta Hay'adaha Dowladda ee CIP-ka, daldaloolka ka jira xagga dhaqan gelinta, iyo meelaha hortabinta leh ee ka jira DFS iyo heerka Maamul-gobalaydka Puntland, intaas waxaa dheer qorsho ku aaddan dib-u-habeynta mashruuca iyo soo gabgabayntiisa ka dib Juun, 2020.

Isuduwayaasha mashruuca CIP-ka Md.Xasan Diiriye iyo Md.Maxamed C / Ilaahi waxay labadooduba soo bandhigeen Guulihii Muhiimka ahaa ee Mashruuca laga soo bilaabo 2015/2016 ilaa 2018 iyo sidoo kale caqabadihii ugu waaweynaa.

Xoghayaha joogtada ah ee xafiiska Raiisul Wasaaraha (OPM) Md.Ahmednur Mohamed wuxuu bogaadiyay guulihii ilaa hada la gaarey, isagoona iftiimiay qaar ka mid ah saameynta ay yeelatay guulihii laga gaaray howlaha mudada dheer la socotay, lana sugayay. Waxaa xusid mudan in marki ugu horeeysay la sameeyay Madax-ka-tirunta guud ee shaqaalaha rayidka. Intaa waxaa sii dheer, in dib-u-habayn iyo dib u qaabayn lagu sameeyay dhamaan hay'adaha

dowladda oo yeeshay waajibaad muuqda iyo howl-qeexidyo kala duwan.

Taageeridda, hirgelinta iyo dhisidda nidaamyada lagu aasaasay mashruuca;

Kooxaha dawladdu waxay muujiyen in mudnaantooda ay tahay in la sii wado dhammaystirka hirgelinta howlaha harsan si loo joogteeyo aasaaska mashruuca u dagsan.

Arrintani; si kastaba ha ahaatee, waxaa la rumeysan yahay inay jирто baahi iyo waqtidheeri ah oo dhaafsiisanaan karo taariikhda xiritaanka mashruuca, sidoo kale waxaa iyadana jiri kara maalgalin dheeri ah inta suurta-galka ah.

Hogaamiyaha kooxda CIP-da ayaa ku booriyey Dowladda inay dhameystirto howlihii horey loo maal-galiyay, iyagoo soo bandhigaya, lagana rabo siyaasadaha la diyaariyey, isla markaana abuuraya saameyn isbadal ah oo loogu talagalay mashruuca.

*Meelaha mudnaanta mashruucu
leeyahay iyo Himilooyinka socda &
howlaha 2019:*

- Hirgelinta talooyinka natijjada warbixinta madax-ka-tirinta (HR Audit) ee adeegga Rayidka; ;
- Horumarinta xeerarka maamulka iyo hab-raacyada maareeynta adeegga rayidka;
- Horumarinta qaab-dhismeedka Mushaharka iyo darajooyinka sidoo kale Habeynta Siyaasadda Mushaharka iyo darajooyinka ee loogu talagalay shaqaalaha adeegga rayidka ee DFS;
- Horumarinta iyo dajinta Siyaasadda Howlgabka iyo sameynta xeerka qabyo-qoraalka sharciga Hawlgabka ee
- Xoojinta awoodda Kormeerka iyo Qiimeynta (M&E), tirakoobta iyo qorshaha ee Wasaarada Qorsheynta
- Taageerida iyo hirgelinta qorshayaasha ku aaddan Maaratnta Isbeddelka ee dib-u- qaabayntii Hay'adaha Dowladda lagu sameeyay, gaar ahaan kuwa asaasiga ah.

- Horumarinta Istaraatijiyyadda Dib-u-habeynta Maamulka Guud ee DFS.
- Aasaasidda iyo horumarinta manhajka barnaamijyada tababbarka ee muddada-fog iyo agabyada tababbarka oo loogu talagalay shaqaalaha adeega rayidka ah ee DFS, iyada oo loo marayo hay'adaha dowladeed ee jira iyada oo lala kaashanayo xarumaha tababarka ee dibedda.
- Xoojinta howlaha la xiriira isku-duwidda siyaasadaha iyo gaarsiinta xarumaha dowladda si saro loogu qaado awoodahooda waxqabad.

Mid ka mid ah caqabada ugu waaweyn ee kooxaha dawladdu ay muujiyeen ayaa ah in ay jiraan arrimo la xiriira hawlo sababay dib u dhacyo kala duwan, kuwaasoo ka codsaday in Bangigu (WB) uu horumariyo arrimahaan laga cabanaya, isla markaasna uu ka dhigto mudnaanta kowaad

Sidaa daraadeed, ka faaideystayaasha mashruuca waxay soo jeediyeen in Bangiga uu oggolaado habraac cusub oo la xiriira dib-u-eegista soo-iibsiga lagu sameeynayo kasoo xaddidan la islana oggolyahay, si loo dhaqan-geliyo hawlo badan oo yar-yar dhaqaajintooda



Kullanka Wadajirka DFS/ Puntland & Mashaariicda Dowladeed ee uu taageero Bangiga Aduunka



Shirki ugu horeeyey ee wadajirka ah ee DFS/ Puntland iyo Bangiga Aduunka ayaa loo qabtay mashruucyada maayinta howlaha dawliga ah ee CIP, PFM & RCRF waxaana kaso qeybalay Saraakiil sare ee ka tirsan Xukuumada Federalka soomaaliya, dowlad gobalaydka Puntland iyo koox hawleedka Bangiga Adduunka oo uu hogaminayo Wakiilka Bangiga ee Soomaaliya. Ujeeddada guud waxay ahayd xoojinta isku-duwidda ka dhexeysa mashaariicda gaar ahaan howlaha la xiriira mashaariicda kuwaasoo is dhamaystiriya midba midka kale iyo sidoo kale in la ogaado xaaladda guud ee horumarka mashaariicda iyo guulaha la gaaray, caqabadaha fulintooda iyo Qorshayaashooda mustaqbalka. Kaqeybgalayaashu waxay qireen in mashaariicdani ay muhiim u yihii isbadallada maaliyadeed iyo maamulka guud ee jira dalka, kuwaasoo dowladdu ay ku amaantay Bangiga Aduunka taageerada ay ka siisay qaab-dhismeedka sharciga iyo nidaamyada teknoliyadda ee ku Horumarisay mashaariicda (Troika Projects) xaga Maamulka guud iyo dib u habeyn Mareynta Maaliyada guud. Maadaama Bangiga Aduunku uu qayb ka yahay dib-u-habeynta shaqaalaha adeegga rayidka, ayaa waxuu ka taageeray DFS iyo Puntland labadaba sameynta iyo dhamaystirkha Madax-ka-tirinta shaqaalaha adeegga rayidka (HR Audit) yo diiwaan-gelinta baayoomitrikada la

xiriirta. Wasaaradaha shaqada iyo Guddiyada shaqaalaha adeegga rayidka ah ee DFS iyo Puntland waxay soo jeediyeen in shaqaalaha adeegga rayidka ah ay lahaadaan nidaam ku saabsan HRMIS guud oo qeyb ka ah howlaha Madax-ka-tirinta kadib, tasoo ay sameeyeen DFS iyo Puntland.

Nidaamka Maareynta Macluumaadka ee Kheyraadka Aadanaha (HRMIS):

Waxaa laysla gartay in kooxaha ka shaqeeya mashriicda khuseysa arintaan sida mashruuca PFM iyo CIP iyo hayadaha dowliga ah ee ay ka midka yihii guddiyada shaqaalaha rayidka ah, Wasaaradaha Shaqada iyo Wasaaradaha Maaliyada ee DFS iyo Puntland, kuwaasoo ay tahay in si farsamo ahaan looga wada hadlo nidaamyadan si loo xaqijiyo sida ugu wanaagsan ee loo soo jeediyo talooyinka. Isuduuhaha Mashruuca RCRF wuxuu faafahiyay in RCRF ay tahay xarunta kharashka CIM laga bixiyo, tasoo ay hagayso Wasaaradda Maaliyadda siyaasadaha fulinta. Waxay aaminsanyihii dhammaan kaqeyb galayaasha oo heerar kala duwan leh in kulankaan uu ahaa mid muhiim ah oo miro-dhal ah, isla markaana si adag loogu taliyay in loo qabto shir sanadle ah, waxayna soo jeediyeen in jadwalka kulankan kan xiga ee wadajirka ah la qabto Diseembar, 2019.



Horumarinta Siyaasadda Howlgabka ee Dowladda Federaalka Soomaaliya

Guddiga hogaaminta Horumarinta Siyaasadda howlgabka ee DFS iyo lataliyaha ayaa waxay qabteen kulamo wadatashi ah oo dib loogu eegayo qabyo qoraalka labaad ee horumarinta siyaasada howlgabka iyo howlgabnimada(Pension Policy and Pension bill). Kulanku wuxuu diiradda ku saaray isbadalada la soo jeediyay ee ku saabsan siyaasada howlgabka iyo sidoo kale qodobada ku xusan Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee no. 5 ee 31 Diseembar 1969 iyo sidoo kale qodobbo la xiriira sharciga howlgabnimada la soo jeediyay.

Lataliyahu, wuxuu kullanka kasoo jeediyay warbixin la xiriirta 'Magdhow Bixinta Waajibka ah ee adeeggii hore' (xirmada xisaabta) iyo talooyin ku aadan. Ujeedada ugu weyn ee siyaasadani, waxay tahay in la helo kala xulasho siyaasadeed ee la xiriirta howlgab munaasab ah, kaas oo dhammaan shaqaalaha adeegga guud ee DFS, kana mid yihii kuwa heshiisyada ku jira (on-contracts) kuwaasoo heli doona dheefta iyo faa'iidooyinka howlgabka iyo in ay helaan

xorriyad maaliyadeed dhamaan shaqaalaha gaaray da'da howlgabka; isla markaasna, wali ka tirsan Hay'adahooda. Kooxda dawladdu waxay si aad ah ugu nuuxnuuxsadeen in maqnaanshaha siyaasad howlgabka iyo sharciga aan qornayn ee dalka marxalada lagu jira ee colaadda kadib, waxay la micno tahay inay caado noqotay in farca shaqalaaha marxuumka ah si toos ah loogu shaqaaleysiyyah shaqada.

Labada koox ee ka faa'iideysan doona dhiirrigelinada ama dalacaadyada waa:

- 1) Dad waayeel ah (oo aan lahayn istiraatiijiyad bixitaan),
- 2) Dhalliyaro jaamiciyiin ah oo firfircoон (oo aan dhiirigelin lahayn).

Xubnaha waxay ka wada hadleen waxyaabaha muhiimka ah ee la xiriira shaqada howlgabka, waxayna guddigu hoosta ka xarriiqueen isbedelada gaarka ah iyo talooyinkooda ku aadan siyaasada howlgabka kuwaasoo lataliyuhu ku darayo qoraalkiisa. Dhameystirka iyo ansaxinta qabyo-qoraalka siyaasada howlgabka iyo sharciga howlgabnimada ayaa la rajeynaya rubuca soo socda.



Aqoon iswey-daarsiga siyaasada & Sharci Qorista

Xafiiska Isuduwidda Mashruuca Tayaynta Hay'adaha Dowladda (CIP), waxuu fududeyay qabsoomidda aqoon-isweydaarsiga Siyaasadda iyo sharci-qorista oo soconayay laba maalmood, kasoo uu codsaday Xafiiska Raiisul Wasaaraha DFS oo la kaashanaayay Wasaaradda Caddaaladda iyo Garyaaanka guud ee dowladda. Muddada Tababarkaasi waxuu ahaa 10-11-kii Abriil, 2019 - kaasoo la xiriiray "Diyarinta Siyaasadaha iyo Qorista Sharciyeed". Aqoon-isweydaarsiga waxaa ka faal'iideystay in ka badan 30 kaqeybgale oo ka kala socday 26-ka wasaaradood.


Arrintan, waxaa la filayaa inay salka u dhigto abuuritaanka Madal/Gole ay ka qaybgalayaashu ku sii wadi karaan isweydaarsiga aragtidooda, isla markaana lagu xoojiyo waaritaanka fikradahooda

Xaalada Shaqaalaha CIM

Sababo la xiriira joojinta maagalinta RCRF ee mashruuca (CIP), ayaa qaar ka mid ah shaqaalaha CIM-ka (gaar ahaan lataliyayaasha ee Stream B) shaqada laga joojiyay. Tirada shaqaalaha imminka ka howlgala waxay ku muujisan yihiin jaantuska hoose:

- Wadarta guud lagu shaqaaleysiay mashruuca: **158** oo (22%) ay yihiin dheddig, 78% lab).
- Tirade guud ee shaqaalaha CIM-ka ka tagay: **49**
- Tirade guud ee imminka ka shaqeysa: **110** (kuwaasoo u kala baxsan: **105** "Stream A" halka **5** qof ay yihiin "Stream B"):

SHAQAALAH MASHRUUCA CIM KU SHAQEYSO (%)





Halkan marwalba nagala soco:



[fb.com/CIPSomalia](https://www.facebook.com/CIPSomalia)



twitter.com/CIPSomalia cip.gov.so



cip.gov.so



© 2019 Project Coordination Unit. Communications. All rights reserved.